

Warbixin kooban oo ku saabsan kaalmada dhaqaale ee nolosha (lacagta ceyrta).

Waa maxay kaalmada dhaqaale ee nolosha (lacagta ceyrta)?

Kaalmada dhaqaale ee nolosha waa waxa ugu danbeeya kaalmo dhaqaale ahaan ee uu dalban karo qofka ku nool Finland ama sharciga deganaanshaha ku heysta amaba qoyska, taasoo ah mid dabooleysa waxyaabaha kharashaadka asaasiga ah.

Kaalmada dhaqaale ee nolosha waxaa laga dalban karaa Kela-da. Haddii ay jiraan kharashaad gaar ah oo lagaa rabo, kuwaasoo aadan ku dalban karin kaalmada dhaqaale ee nolosha, waxaad xafiiska sooshalka ee degmada ka dalban kartaa dhameystirka ama ka hortaga kaalmada dhaqaale ee nolosha.

Yaa xaq u leh in uu helo kaalmada dhaqaale ee nolosha?

Waxaad xaq u leedahay in aad hesho kaalmada dhaqaale ee nolosha, haddii dhammaan dakhliga ku soo gala iyo hantidaaduba aanay ku filneyn in aad ku bixiso kharashaadka lagamamaarmaanka ee maalinlaha ah, sida cuntada, dharka , guriga iyo arimaha caafimaadka.

Inta aadan dalban kaalmada dhaqaale ee nolosha waa in aad hubisaa , in aad dalban karto iyo in kale kaalmooyinka kale ee dhaqaale sida, lacagta shaqo la'aanta (työttömyysturvaa) iyo tan kabista ijaarka guriga (asumistuki). Dalbo marka hore dhammaan kalmooyinka kale ee dhaqaale ee aad xaq u leedahay.

Sidee loo xisaabiyaa cadada dhaqaalahaas?

Kaalmada dhaqaale ee nolosha waxaa saameyn ku leh dhammaan dakhliga iyo hantida aad adiga iyo qoyskaaguba leedihiin. Waxaad ka ogaan kartaa kaalmada dhaqaale ee nolosha ee aad adiga iyo reerkaagaba xaq u leedihiin xisaabiyaha aad ka heleyso cinwaankan kela.fi/laskurit.

Sidan u dalbo kaalmada dhaqaale ee nolosha

Waxaad kaalmada dhaqaale ee nolosha ka dalban kartaa cinwaankan kela.fi/asiointi. Waxaad sidoo kale kaalmada dhaqaale ee nolosha ku dalban kartaa foomka qoraalka ah Foomamka waxaad ka heli kartaa xafiiska Kela-da ama cinwaanka internetka kela.fi/lomakkeet. Waxaad codsiga dhigi kartaa sanduuqa boostada ee xafiiska dhexdiisa yaalla ama boostada caadiga ayaad Kela-da ugu soo hagaajin kartaa

Xusuuso waliba inaad codsiga ku darto dhammaanba lifaaqyada lagaaga baahan yahay. Biilasha waxaa laguugu darayaa ama laguugu xisaabinayaa qeyb ka mid ah kaalmada dhaqaale ee nolosha. Haddii aad biilasha adigu sii bixisay, xafiiska kela-da ayaa adiga kuu soo shubaaya lacagtaas aad biilasha ku bixisay. Sidoo kale Kela-da waxaa ay biilasha adiga lagu soo direy toos ugu shubi kartaa ciddii soo dirtey, sida biilka korontada ama kan ceymiska. Codsiga bixinta biilasha waa in mid walbaa si gaar ah loo soo codsado, iyadoo lagu soo qoraayo in biilkan loo diro ciddii soo dirtey ("maksetaan laskuttajalle").

Codsiga kaalmada dhaqaale ee nolosha waxaad Kela-da u soo diri kartaa 2 todobaad kahor inta aanay bishu dhammaan, haddii dakhligaaga iyo kharashkaaga aanu bisha soo socota wax isbedel ah ku imaaneynin.

Wax ka qabashada codsiga

Go'aanka waxaad ku heleysaa 7 maalmood gudahood oo maalmaha shaqada ah. Arinkan waxaa shardi u ah, in aad Kela-da u soo dirtey dhammaan lifaaqyadii lagaa doonaayay si wax looga qabto codsigaaga.


Goorma ayaa kaalamada dhaqaale la soo shubaa?

Kaalmada dhaqaale ee nolosha ee asaasiga ah waxaa la soo shubaa maalnka ugu horeysa bihsa ee uu bankigu furan yahay. Haddii lacagtaas la soo shubay aan laga soo gaarsiin karin maalinkii lacagta loogu talagalay ee lacag bixinta, waxaa ay akoonkaaga ku jirtaa maalinka labaad ee uu bankigu furan yahay, laga soo bilaabo markii go'aanka la gaaray Haddii lagu siiyay lacagta kaalmada nolosha, aadna u baahan tahay daawo, waxaa lagu siinayaa waraaqda farmashiyaha daawada looga soo iibsado

Warbixin dheeraad ah:

 kela.fi/social-assistance

 [lambarka adeega macmiilka 020 634 2550](tel:0206342550)

 [Xafiisyadagoobaha xafiisyada deegaanka iyo adeegyada kale ee macaamiisha](#)